

Sebteembar 16, 2016

Waalidka Qaaliga ah ee Gordon Parks High School

Wasaarada Waxbarashada ee gobolka Minnesota ayaa mar dhow soo saartay macluumaadkeedii ku saabsanaa qiimaynta horumarka iskuullada ee gobolka ee loo yaqaano (Multiple Measurement Ratings-MMR).

MMR waxay ku qiimaynaysaa iskuullada arimahan soo socoda: 1) iskuul walba caddadkiisa ardayda ku-waas oo gaaray heerkoodii waxbarashada ee laga rabay ee ku aaddan darajada fasalkooda (grade level), 2) inta uu la'egyahay horumarka uu arday walba sameeyay, marka loo fiiriyo halbeegga laga rabo fasalkiisa, iyo 3) farqiga waxbarasho ee u dhexeeya ardayga ugu hooseeya iyo ardayga ugu sareeya iskuul walba. Qiimaynta MMR waxaa laga soo cabiraa heerka uu iskuul walba ka joogo imtixaanaadka qiimaynta buuxda ee sanadlahaha ah ee gobolka ee loo yaqaano Minnesota Comprehensive Assessment –MCA). Sidoo kale MMR waxay ka tarjumi kartaa heerka uu gaarsiisanyahay qalinjabinta dugsiyada sare.

Jawaabtii ka timid qiimayntii MMR Gordon Parks High School wuxuu ahaan doonaa iskuul diiradda ama isha lagu hayo (to be focus school). Iskuullada diiradda lagu hayo waxay ka midyihiin boqolkiiba 10-ka iskuul ee heerkooda waxbarasho ugu hooseeyo kuwaas oo la siiyo dhaqaalaha loo yaqaano Title1 funding. Iskuulkeena qiimayntan wuxuu ku helay dhibcihiisa imtixaanka oo hooseeyay sida lagu sheegay warkii ka soo baxay imitxaanaadkii MCA isagoo ka mid ah boqolkiiba 10 ka mid ah dugsiyada gobolka ee saamaynta weyn ku yeeshay bugcadda guul gaadhka ee gobolka.

Sanad dugsiyeedka 2016-2017, waa sanadkii aan xoogga saari lahayn sidii aan u taageeri lahayn ardayda oo dhan, si aan u caawino horumarkooda waxbarasho, iyo in aan sare u qaadno maqaanka iskuulkeena ee gobolka. Si aan heerkaas u gaarno waxaan isu keenaynaa kooxda horumarinta, kuwaas oo ka kooban shaqaale, waalidiin, iyo dad ka tirsan jaaliyadda guud. **Waalidiinta aad ayaa loogu dhiirigalinayaa in ay xubin ka noqdaan kooxda horumarinta iskuulka. Haddii aad arintaan xiisaynaysid, fadlan iga soo wac 651-744-1212.** Haddii aan horumar la taaban karo gaarno sanadaha soo socoda Gordon Parks High School, iskuulkeenu ma sii ahaan doono iskuul diiradda ama isha lagu hayo.

Gordon Parks High School Wuxuu ku dadaalayaa in ardayda oo dhan uu siiyo waxbarasho heer sare ah. Fadlan nagu taageer ilmahaaga shaqadiisa fasalka, adoo la hadlaya macallinka ilmahaaga, ka qaygalka, iyo in aad ka qaybqaadato fursadaha kale ee ka dhacaya iskuulkeena. Barnaamika qoysaska ee ka qayb qaadashada iskuulka waxaad ka heli kartaa baraha intarteedka ee iskuulkeena gordonparks.spps.org, waxaa kalood ka heli kartaa halkaas siyaabo kale oo aad ooga qayb-qaadan karto waxbarashada ilmahaaga.

Waxaan rajaynaynaa sanad wax soo saar leh.

Mahadsanid,

Traci Gauer, Maamulaha, Gordon Parks High School